



Feebaraayo 26, 2021

## Macluumaadka talaalka COVID-19 ee loogu talagalay Dadka Waayeelka ah ee Oregon

**Maarso 1, 2021**, Dhammaan dadka waayeelka ah ee jira 65 iyo kasii wayn ayaa u qalmi doonaan inay helaan talaalka dhammaadka Feebaraayo. Ugu dambayn **Maarso 29**, dadka ku nool guryaha waayeelka ee dakhliga hooseeya, oo ay ku jiraan isu keenidda waayeelka iyo noolanshaha madaxa-banaan, ayaa uqalmi doona.

Waxaa ku jira kooxdan in ka badan 766,000, heerkan soo saariteenna oo ay ku jiraan dadka waaweyn ku dhawaad 156,000 oo ah dadka reer Oregon da'ada 70 iyo ka weyn oo qaatay ugu yaraan hal talaal. Taasi waxay ka tahay boqolkiiba 31 dhammaan waayeelka uqalma hadda. Ku dhawaad boqolkiiba 45 dadka ah 80 ama ka sii weyn ayaa la talaalay. 194,565 qof oo ah da'da 65 ama ka sii weyn ayaa qaatay ugu yaraan hal qiyaas oo ah talaalka COVID-19 (laga bilaabo Feebaraayo 25-keeda) Taasi waa 1 ka mid ah 4-tii waayeel.

Gobolku wuxuu sii wadayaa tallaabadaa si loo siiyo qiyaasaha koowaad 75% dhammaan dadka reer Oregon, markay tahay Maarso 29 qiyaasaha talaalka koowaad. Waxaannu ku bixinaynaa dedaal dheeraad ah si aanu u hubino in qof kasta oo da'a ah oo reer Oregon ah uu qaatay talaalka. Waa tan meesha iyo sida dadka da'da ah ee reer Oregon ay u qaadan karaan talaalka:

Halkee	Sidee
<ul style="list-style-type: none"> <li>Munaasibadaha talaalka ee dadka badan</li> <li>Isbitaalada</li> <li>Hay'adaha caafimaadka dadweynaha deegaanka</li> <li>Farmasiyada, oo ay ku jiraan goobaha daryeelka muddada dheer</li> <li>Xarumaha Caafimaadka ee La Aqoonsaday Federaal ahaan (FQHCs)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Wac 211 ama 1-866-698-6155 Waxaa jiri doona waqti sugitaan oo aad u dheer toddobaadada soo socda.</li> <li>Uga qabso ballamo si toos ah websayd-yada farmasiyada tafaariqda Waxa kale oo aad wici kartaa farmasiyada bixinaya talaalada: <ul style="list-style-type: none"> <li>Costco: <a href="https://www.costco.com/covid-vaccine.html">costco.com/covid-vaccine.html</a></li> <li>Health Mart: <a href="https://www.healthmartcovidvaccine.com">healthmartcovidvaccine.com</a></li> <li>Safeway/Albertsons: <a href="https://www.safeway.com/pharmacy/covid-19.html">safeway.com/pharmacy/covid-19.html</a></li> <li>Walgreens: <a href="https://www.walgreens.com/findcare/vaccination/covid-19">walgreens.com/findcare/vaccination/covid-19</a></li> </ul> </li> </ul>

Halkee	Sidee
	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ka hel macluumaadka xiriirka talaalka ee degmadaada: <a href="https://www.oregon.gov/oha/covid19/Pages/vaccine-information-by-county.aspx">https://www.oregon.gov/oha/covid19/Pages/vaccine-information-by-county.aspx</a></li> <li>• Haddii aad ku nooshahay ama aad ka shaqaysid goob daryeelka muddada dheer oo qayb ka ah iskaashiga farmasiga federaalka, tag mid ka mid ah saddexda rug caafimaad ee goobta ee la qorsheeyay.</li> </ul>

## Dadka reer Oregon ee ku jira goobaha daryeelka muddada dheer ee AAN laga talaalayn barnaamijka farmasiga federaalka

CDC lama shaqayn xarun kasta oo ah daryeelka muddada dheer ee Oregon. Marka gobolku wuxuu ka shaqaynayaa inuu hubiyo dadka Oregon ee ku nool ama ka shaqeeya goobta daryeelka muddada dheer ee AAN qaybta ka ahayn barnaamijka federaalka ay ugu qaadan karaan talaalka kahortagga COVID-19 qaab kale.

Wakaaladahan soo socda ayaa la shaqaynaya hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanka (LPHAs) iyo Ururada Daryeelka Isu duwidda (CCOs) si la iskugu xiro xarumaha aan ka diiwaangashanayn barnaamijka farmasiga federaalka ee fursadda talaal:

- Xafiiska ODHS ee Adeegyada Horumarinta Naafonimada (ODDS) iyo Barnaamijyadeeda Horumarinta Naafonimada ee Bulshada (CDDP) iyo dillaalada;
- Xafiiska ODHS ee Da'da iyo Dadka ah Naafada (APD) iyo Hay'adaheeda Aagga ee Da'ada (AAA); iyo
- Caafimaadka Habdhaqanka ee OHA

Hadafku waa in la hubiyo in qof kasta oo u qalma oo Oregon ah oo raba talaalka COVID uu qaadan karo labada qiyaasood ba.

## Dadka da'da ah ee Oregon ee leh caqabadaha socod iyo/ama gaadiid

Waxaannu ognahay in dad da'a ah oo Oregon ah ay wajahayaan caqabado ah helitaanka talaalka, oo ay ka mid yihiin caqabadaha socodka iyo gaadiidka. Haddii aad ka diiwaangashan tahay Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) midkood Ururka Daryeelka Isu duwidda (CCO) qorshaha daryeelka maaraysan ama qorshaha Kaarka Furan ee OHP (khidmadda adeegga), waxaad isticmaali kartaa Gaadiidka Caafimaadka Aan Degdegga ahayn (NEMT) si aad u gaadhid goobta talaalka oo aad ugu soo laabatid guriga. Si aad u heshid kheyraadkan, tag websaydkan ah khariidada dillaalada NEMT:

<https://www.oregon.gov/oha/HSD/OHP/Tools/Transportation%20Brokerage%20Map.pdf>.

Marka, u wac dillaalada si toos ah si aad u qabsatid raacitaan.

Haddii aad tahay qof weyn oo da'a ah ama qof weyn oo naafo ah, waxaa ka jiri kara adeegyo kale xaafadaada oo ka caawinaya gaadiidka. Si aad wax badan u ogaatid, kala xiriir [Isku xirka](#)

[Kheyraadka Da'da iyo Naafada ee Oregon](https://www.adrcforegon.org/consumersite/index.php) (ADRC) lingaxa soo socda si aad u aragtid gaadiidka ku salaysan xaafadda iyo adeegyada kale ee la heli karo si ay ku caawiso: <https://www.adrcforegon.org/consumersite/index.php>.

Haddii aad ka hesho adeegyada guriga Xafiiska Adeegyada Aadanaha ee Waaxda Oregon (ODHS) ee Da'da iyo Dadka Naafada ah (APD), waad weydiisan kartaa bixiyahaaga maalgalinta guriga ee Medicaid si uu kuugu qaado rugta caafimaad oo uu kuugu sugo rugta caafimaad.

## **Jadwalka isku xigxiga ee dhammaan dadka Oregon**

**Helitaanka dukumiintiga:** Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. Kala xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).